IIB MA GALO

# NTA RASMIGA AH

# الجريدة الر

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

5aad Muqdisho 20 Luulyo 1977 L. 2 R 7

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

**BIL SOO BAX** جريدة شهرية

waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya — Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo go'ey wuxuu qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah

Lacagta lagu Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K O O B N I I N

### BOGGA KOOWAAD

### S H A R C I


SHARCI L. 45 ee 1da Luulyo 1977, — Dhismaha Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda — Bogga 719

SHARCI L. 46 ee 1da Luulyo 1977, — Abuuridda Guddiyada Difaaca Kacaanka Soomaaliyeed — » 722


### BOGGA LABAAD

### X E E R

*W. M*

### *BOGGA SADDEXAAD*

*W. M*

*TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MIM AH*

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA — MUQDISHO

*BOGGA LABAAD*

S H A R C I

**SHARCI L. 45 ee 1da Luulyo 1977.**
**Dhismaha Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda.**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA
DIMOQRAADIGA EE SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad 3aad iyo Sharciga Tr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969kii.

MARKUU ARKAY: Sharciga Tr. 17, 18 iyo 19 ee 1dii Luulyo 1976kii.

MARKUU ARKAY: In ay lagama maarmaan tahay in la habeeyo Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Go'aannadii Kal-fahigii 3aad ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

MARKUU DHEGEYSTAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo 1.7.1977da, Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda Soomaaliyeed, waxaa laga dhigay Ciidan Madax bannaan.

Qodobka 2aad

B. Arrimaha Hawlgelinta, Tababarka Dagaalka, Hubeynta iyo Difaaca Dalka, wuxuu ku xirnaanayaa (ka helayaana) Wasaaradda Gaashaandhigga J.D.S.

T. Arrimaha la xiriira Abaabulka, Kicinta iyo Baraarujinta arrimaha Bulshada, wuxuu kala xiriirayaa (la kaashanayaana) Hoggaanka Abaabulka X.H.K.S. (Urrrada Bulshada).

Qodobka 3aad

B. Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda, waa Kaydka Difaaca ee Dalka, waxaana Amarka Kicinta buuxda ah bixin kara Xoghayaha Guud ee X.H.K.S., Madaxweynaha JDS.

T. Amarka Kicinta Dhiman ah (DIGNIINTA DAGAALKA) ee Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda, waxaa bixin kara Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, asagoo u soo marinaya Taliska Guud ee Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda.



Qodobka 4aad

Ciidanka Guulwadayaasha Ummaddu waxay ka kooban yihiin sida soo socota:

B. Dadka joogtada ah oo u kala baxa :

— Saraakiil, Saraakiil-Xigeen iyo Dabley.

T. Dhammaan qaybaha kale oo ay ka koobanto Ummadda Soomaaliyeed.

Qodobka 5aad

Dadka ku xusan Qodobka 4aad, waxaa waajib ku ah in ay fuliyaan Tababarrada Diyaargarowga Difaaca Dalka oo ah inuu ruux waliba maro iyo difaacidda Dalka marka loogu baaqo.

Qodobka 6aad

Waajibaadka Siyaasadeed ee Ciidanka Guulwadayaasha Ummaddu waa kan saameynaya, kor u qaadidda Garaadka Siyaasiga ah ee Ummadda Soomaaliyeed, Nabadgelinta - u diyaargareynta Dadweynaha sidii ay u difaaci lahaayeen Dalkooda, Baabi'inta Qabyaaladda, Goboleysiga, Fexda iyo Caadooyinka is hortaagaya Horukaca Ummadda Soomaaliyeed

Qodobka 7aad

Waajibaadka Bulshada ee Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda waa habeynta Difaaca Rayadka (Civil Difence) ee laga sameynayo Magaalooyinka iyo Tuulooyinka, ilaalinta meelaha lagu kaydiyo Hantida Qaranka, gargaaridda dadka waxyeelladu gaarto, ka qaybgalka ka hortaga Cudurrada Faafa, Badbaadada Caafimaadka dadweynaha iyo fulinta Hawlaha Iskaa wax u qabso.

Qodobka 8aad

Taliska Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda, Xaruntiisu waa Muqdisho, wuxuu ku yeelan doonaa Talisyo dhammaan Gobollada, Degmooyinka, Tuulooyinka iyo Heerarka ugu hooseeya ee degaanka Bulshada.

Qodobka 9aad

Taliyaha Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda, waxaa magacaaba Madaxweynaha JDS, waana xubin Guddiga Nabadgelya ee Qaranka.

Qodobka 10aad

B. Taliyeyaasha Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda ee Gobollada iyo Degmooyinka waxaa magacaaba Taliyaha Ciidanka Guulwada-

yaasha Ummadda, waana xubno Guddiyada Nabadgelyada.

T. Wuxuu kaloo magacaabaa Madaxda Xafiisyada Taliska Guud ee Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda.

Qodobka 11aad

Taliyaha Ciidanka Guulwadayaasha Ummaddu, wuxuu bixin karaa Darajada ah ilaa Saddex-Xarigle, waana goyn karaa.

Qodobka 12aad

Taliska Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda, wuxuu Qorsheeyaa, isku duwaa, Kormeeraana Tababarrada Militariga ee la siiyo Dadka ku xusan qodobka 4aad.

Qodobka 13aad

B. Dadka ku dhinta ama ku dhaawacma ayagoo ku hawshoon Tababarrada lagu daryeelayo Difaaca Dalka (ama ayagoo Difaacaya) Dalka, waxaa loo aqoonsanayaa Ruux ay wax ku gaareen hawl qaran.
T. Waxaa lagu xaq marinayaa sharciga Ciidanka Qalabka Sida.

Qodobka 14aad

Dadka jootada ah ee ka tirsan Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda, marka ay galaan Dembi Militari waxaa looga gudayaa Sharciga Ciidammada Qalabka Sida, Xeerka anshaxa iyo asluubta, Ciidanku wuxuu noqonayaa kan Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 15aad

Sharcigaani wuxuu yeelan doonaa Xeer nidaamiye uu oggolaado Madaxweynaha J.D.S.

Qodobka 16aad

Sharcigaani wuxuu dhaqan galayaa 1.7.1977da.
Muqdisho, 1da Luulyo 1977.

(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha J. Dimcqraadiga Soomaaliya



**SHARCI L. 46 ee 1da Luulyo 1977.**
**Guddiyada Difaaca Kacaanka Soomaaliyeed.**

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad, 3aad iyo Sharciga Tr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969kii.

MARKUU ARKAY: Sharciga Tr. 17, 18 iyo 19 ee 1dii Luulyo 1976kii.

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo nabadgelinta iyo difaacidda Ummadda Soomaaliyeed.

ASAGOO TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGAAN:

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo 1.7.1977, waxaa la dhisay (abuuray) Guddiyada Difaaca Kacaanka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Guddiyada D.K.S. waxay si toos ah u hoos yimaadaan XHKS (Xaf, Waax, Guddi, Tuul.)

Qodobka 3aad

G.D.K.S. waxay u baahan yihiin hab degaan, waxayna leeyihiin:
— Guddiga Difaaca Kacaanka Soomaaliyeed ee Qaranka.
— Guddiga Difaaca Kacaanka Soomaaliyeed ee Gobolka.
— Guddiga Difaaca Kacaanka Soomaaliyeed ee Degmada, (Xaf, waax, Guddi, Tuul).
— Guddiga Difaaca Kacaanka Soomaaliyeed ee Tuulada.

Qodobka 4aad

Waajibka G.D.K.S. waa:
— Nabadgelinta iyo Difaaca Ummadda Soomaaliyeed, Kacaankeeda, Xisbigeeda iyo Mabda'a Hantiwadaagga ee Cilmiga ku dhisan, ayaga oo la kaashanaya Ciidammada Nabadgelyada iyo Wasaaradda Gaashaandhigga.

Qodobka 5aad

G.D.K.S., waxaa ka qaybgeli kara kuwa ugu Kacaansan Ummadda Soomaaliyeed, una hoggaansan Kacaanka, iyo Xeerka Barnaamijka X.H.K.S.

Qodobka 6aad

Ilaa iyo waqtiga habboon laga gaaro, hoggaamiyeyaasha, G.D.K.S. (Xoghaynta), waxaa soo xulaya Guddiyada D.K.S., heerarkooda kala duwan (Qaran, Gobol, Degmo, Waax iyo Tuulo).

Qodobka 7aad

G.D.K.S., heer kasta wuxuu ka koobmaa (Xoghayn)

1. Guddoomiye.
2. Xoghaynta Abaabulka.
3. » Ilaalinta.
4. » Idiyooloojiyada.
5. » Waxbarashada.
6. » Caafimaadka.
7. » Hawlaha iskaa wax u qabso.

Dadka intaa ka soo hara waa xubin guddi ee caadi ah.

Qodobka 8aad

Ka qayb gelidda sare u qaadidda heerka Tacliinta dadweynaha, iyo heerka Caafimaadka Bulshada Soomaaliyeed, ayagoo la kaashanaya Wasaaradda Caafimaadka iyo Ururka Bisha Cas.

Qodobka 9aad

Waxaa ku waajiba ruux kasta oo Soomaali ah ee da'diisu gaartay 14 sano iyo ka weynba, ka qayb galka hawsha Guddiyada D.K.S. (Ilaalinta), ayadoo aan la fiirinnin hawsha uu hayo, (Ciidanka Qalabka Sida, Urur Bulsho, iyo Dadweyne intaba).

Qodobka 10aad

Guddoomiye waxaa noqon kara ruux ku sifoobay :
Waddaninimo, Kacaannimo iyo Daacadnimo Buuxda.

Qodobka 11aad

Markii loo baahdo tababar Xirfad Mileternimo, waxaa lala kaashanayaa Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda.

Qodobka 12aad

Wixii la xiriira Difaacidda Gudaha (Civil Difence), waxaa lala kaashanayaa «Ciidanka Boliiska iyo Ciidanka Nabadsugidda Soomaaliyeed.

Qodobka 13aad

Agaasinka Iskuduwidda iyo abaabulka hawsha G.D.K.S., waxaa ka mas'uul ah Taliska Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda Soomaaliyeed, iyo Guddiga Xisbiga ee (Gobolka, Degmada, Xaafadda, Waaxda iyo Tuulada).

Qodobka 14aad

Sharcigaani wuxuu yeelan doonaa xeer nidaamiye faahfaahinaya, waxaana oggolaan doona Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 1da Luulyo 1977.

(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J. Dimoqraadiga Soomaaliya